

## Qof kale wuu kaa caawin karaa inuu kugu soo adeego kaarkaaga WIC

FEBRAAYO 4, 2026

Waxaad u oggolaan kartaa qof aad ku kalsoon tahay inuu kaa caawiyo soo iibinta cuntooyinka WIC.

**Haddii aad qof kale ku aaminto isticmaalka kaarkaaga WIC:**

- U sharax xeerarka iyo sida loo isticmaalo kaarka WIC.
- Sii kaarkaaga WIC iyo lambarka sirta ah (PIN).
- U sheeg inuu kaaga soo ageego dukaan WIC oggol yahay.
- Qofka wax ku soo iibsanaaya waa inuu cuntooyinka WIC isku geeyaa si ay u fududaato la socodka waxyaabaha WIC lagu iibsaday.
- WIC **ma beddeli karto** cuntooyinka WIC haddii qofkaasi doorto shay khaldan ama uusan kuu soo wada keenin dhammaan cuntooyinka.
- Qof aad ku kalsoon tahay wuxuu kuu soo qaadi karaa dalabka Hy-Vee Aisles Online. Waxaad dalabka Hy-Vee ku samayn kartaa internetka, ka dibna qofkaasi ha kuu soo qaado oo ha kuu keeno (eeg [WIC Online Shopping at Hy-Vee](#) [WIC Online Shopping at Hy-Vee \(PDF\)](#) (<https://www.health.state.mn.us/docs/people/wic/vendor/online2.pdf>) si aad u hesho faahfaahin).

## Talooyin ku saabsan wax iibsiga WIC

- Ka dukaameyso dukaamada WIC oggol yahay si aad u iibsato cuntooyinka WIC la oggol yahay.
- Istimmaal Minnesota WIC App si aad u iskaangareyso cuntooyinka oo aad u hubiso inay oggol yihiin isla markaana ku jiraan faa'iidooyinkaaga.
- Istimmaal Minnesota WIC App si aad u iskaanto cuntooyinka oo aad u hubiso inay oggol yihiin isla markaana ku jiraan faa'iidooyinkaaga.

## Xeerar iyo xusuusin marka aad wax iibsanaayo

- Ka fogee kaarkaaga birlabyada (magnets) iyo qalabka elektarooniga ah si looga hortago dhaawac.
- Istimmaal kaarkaaga WIC marka hore, ka dib SNAP EBT (haddii aad haysato), ka dibna kaarka deynta, kaarka debit-ka, ama hababka kale ee lacag-bixinta.
- Habka bixinta (checkout-ka) wuu ku kala duwanaan karaa dukaamada – weydii qasnajiha goorta aad kaarka mariyeyso haddii aad u baahan tahay inaad kala soocdo cuntooyinka WIC.
- Dib u eeg rasiidka ka hor inta aadan ansixin iibka WIC.
- Ha beddelan ama ha celin cuntooyinka WIC ama caanaha ilmaha (formula) si aad u hesho lacag, credit, ama alaabo kale.

## Ilaali kaarkaaga WIC si ammaan ah

- Ha ku qorin lambarkaaga sirta ah (PIN) kaarka WIC.
- Ha iibin, hana isku dayin inaad iibiso, ku beddelato, ama ku bixiso hadiyad kaarkaaga WIC, cuntooyinka, ama caanaha ilmaha (formula).
- Haddii qof aad ku kalsoon tahay isticmaalo kaarkaaga, hubso inuu kaarka kuu soo celiyo marka uu wax iibsiga dhammeeyo. Ka fiirso beddelidda PIN-kaaga.
- La socodsii kiliniggaaga WIC haddii kaarkaaga lumo, la xado, ama uu burburo.

Minnesota Department of Health - WIC Program, 625 Robert St N, PO BOX 64975, ST PAUL MN 55164-0975; 1-800-657-3942, [health.wic@state.mn.us](mailto:health.wic@state.mn.us), [www.health.state.mn.us](http://www.health.state.mn.us); Si aad macluumaadkan ugu hesho qaab kale, wac: 1-800-657-3942.

Hay'addanan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay.